Fu,aad Sh.Abuubakar Ismaacil
Bahda Mareegta Farsahxan

# Xuska 6DA April 1981kii.

"Xiligan oo kale gu' walba bahda mareegta farshaxan waxay soo bandhigtaa taariikh nololeedka Mujaahid ka mid ah mujaahidiintii SNM,una qaadataa Mujaahidka sannadka"

# Taariikhdii Mujaahid General

# Cali Xuseen Cabdi

Qalinkii: Fu,aad Sh.Abuubakar
Mareegta Farshaxan
April 6, 2009.

Dhidib weeyi taariikhdu iyo waayo soo dhaca e
Dhalaankiyo caruurtay u tahay dhaxal u meel yaale
Dhafoor qiiqlayaal iyo cabdow dhuuncas iyo gaade
Iyo baado dhalandhoola oo dhagar u soo xaytay
Dhidar iyo waraabiyo abees diir wax dhilanaysa
Iyo qaar dhac loo soo diroo shayna dhaafaynin
Waatii dhufaysyaday qoteeen loogu soo dhacye

Markuu soodhku dhaashaday markuu dhiigu shalaxbeelay
Markuu qumuca dhiilada sidaa laba dhaclaynaayay
Sida dhool gu' oo da'ay markuu dhibicu heehaabay
Dhab markii dagaal loo galiyo dhiidhi dirirreedka
Dhudi yaa lahaayeey markii lagu dhawaaqaayey
Dharaartaa ninkii maali jiray dhici xaqiisiiye

Mujaahid Cabdiraxmaan Cawl –baqdaadi-



General: Cali Xuseen Cabdi

Sooyaalka taariikhdu wuxuu inala wadaagaa dhacdooyinka mudan tixgelinta iyo ku dayashada , isagoon ka tagayn inuu golaha soo dhigo waayihii guracnaa ee ummadu soo martay iyo maamuladii lagu hoogay si loogu tusaale qaato .Sidaa darteed ayaa uu Nabigu-NNKHa- inagu dhiirigeliyey inaan qofka iimaanka leh aanay ka suurtoobin in meel laba jeer laga wada qaniino markuu lahaa odhaan sidan af celinteedu u dhawaanayso:


...reegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Fu,aad Sh.Abuubakar Ismaaciil
Bahda Mareegta Farsahxan

"A believer is not bitten twice at the same hole".

Gu'ba gu' riix , dhacda walibana tu kale inoo gudbisay , ee xili ku beegnayd 1939kii ayaa u aheyd curasho aragtida Soomaali weyn ee maanta dadka qaarkii ku sheegaan "muqadas" oo markii danbe aasaastay ururo u halgama. Halgamadaas oo ay hormood ka kala ahaayeen Xisbigii SYL oo la aasaasay 1943kii una halgamayey xornimada Italian Somalia oo maanta ah la yidhaa Soomaaliya iyo Xisbigii SNL oo la aasaasay 1947kii una halgamayey xornimada British Protectrate Somaliland oo maanta ah Jamhuuriyadda Somaliland. Muddo ka dibna waxaa halgankaa xornimada Somaliland ku biiray xisbiyadii NUF iyo USP. Odhaahdan ah mar i dage Alla ha dago, laba jeer i dagase anigaa is dagay ayay ka dhinbiil qaateen mujaahidiinta Somaliland dibna ula soo noqdeen xornimadoodii sodomeeyo gu' ka dib.

Xiligaa 1939kii waxaa bilaabmay dagaalkii 2aad ee aduunka. Waxaanu xiligan Hitler heshiis la saxeexday Dawladii Midawga Soofiyeet (Ruushka) una suurtogalisay inuu si fudud ugu duuli karo Poland ,iyadoo ra'iisal wasaarihii Ingiriiska Neville Chamberlain idaacada ka sheegay inuu Ingiriisku galayo dagaal ku lid ah Jarmalka kuna kaliftay in caruur badan oo waalidkoood hagayo qaxeen .

Isla gu'gan 1939kii baa shirkada ingiriiska ee la yidhaahdo SHELL ka baadhay gaas Oodweyne,iyo meel Berbera u dhaw oo la yidhaahdo Xidhka - Saliidda, markii ay labadaba fajaastay baa waxa bilaabmay dagaalkii labaad ee aduunka, iyada oo wakhtigaas dawlada Ingiriiska ku jirtay dagaalka bay awood u wayday in ay sii wado qoditaanka.

Afka Soomaaliga waxaa horumarkiisa aad uga shaqeeya dad dhawr ah ,hadaba gu'gan 1939kii waxaa u dhashay qoraaga weyn ee Ruushka ah Dr.George Kapchits, aadna ugu amaanan sida uu ugu heelan yahay kobcinta iyo daryeelida afkeena hooyo. Si kastaba ha ahaatee gu'gani wuxuu ummada Soomaliland u leeyahay tilmaan ka duwan kuwaa kore markii Aabo Xuseen Cabdi"Isku-Joog Xumme" iyo hooyo Aamina Jaamac uu magaalada Sheekh ugu dhashay wiil ay ugu wanqaleen Cali .Cali Xuseen waxaa la dhashay shan wiil oo ay laba ka mid ah xagga aabo ka walaalo ahaayeen , halka ay saddexda kale ay ka walaalo ahaayeen xagga hooyo.

Wuxuu Cali ka soo jeeday qoys iska ladan. Mujaahid Cali Xuseen Ilaahay ma siin waqti badan inuu la qaato aabihii oo markuu da'da gaadhay meelahaa sideed jir baa aabihii Cali Xuseen geeriyooday ,halkaas baanu yaraaan ku agoomoobay mujaahidku. Geerida Xuseen Cabdi(IHUN) waxaa loo tiriyaa baabuur kula qalibmay degmada Dacar Budhuq . Xuseen Cabdi(IHUN) waxa uu ahaa nin iska ladan oo dukaano, beero, lo' fara badan , adhi fara-badan, iyo dhismayaal baayac-mushteri ku lahaa magaalooyinka Berbera, Sheekh, iyo Burco. Waxa kale oo uu raashinka geyn jiray galbeed wixii Hargeysa ka xiga, isagoo hargahana dhoofin jirey.Waxaase Ilaahay ku galaday Muj.Cali iyo walaaladiiba markuu adeerkood Aw-Faarax Cabdi (IHUN) oo badmareen ahaa soo noqday reerkii oo dhana gacanta ku dhigay.



Muj.Cali Xuseen wuxuu malcaamad Quraanka, dugsiga hoose iyo ka dhexeba ku dhamaystay dugsigii ku yaalay magaalada Sheekh. Dawlada Masaarida ee uu hogaaminayey Jamaal Cabdi Naasir xiligii gobanimodoonka qaarada Afrika, ayaa deeq


8 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

waxbarasho ku salaysan ciidan ahaan siin jirtay ururada gobonimodoonka .Xilli ku dhowayd 1953 kii ayaa Muj.Cali Xuseen iyo arday ilaa 16 ah laga siiyay deeq waxbarasho magaalada Qaahira ee dalka Masaarida, halkaas oo uu ku galay dugsigii Sare, iyo heerkii Jaamacada koowaad. Ardayda aadka loo yaqaano ee ay Muj.Cali Xuseen wada tageen Qaahira xilligaasi waxa ka mid ahaa Ambassador Cabdilaahi Kongo, Axmed Xassan Muuse (hore wasiir Somaliya u ahaa), Axmed Maxamuud Faarax (IHUN).oo hore wasiir dawladii Soomaliya uga ahaa, iyo Suldaan Cismaan Cali Kooshin. Waxa kale oo ku jiray niman fara-badan oo Milaterigii heer sare ka gaadhay sida Dable Jaamac Xaaji Cilmi, iyo Cabdulqaadir Cumar Askar(IHUN).

Markuu soo dhamaystay waxbarashadii jaamicada heerka koowaad wuxuu dib ugu soo laabtay dalkiisii hooyo. Muj.Cali Xuseen wuxuu xidigle ka bilaabay magaalada Hargeysa in yar uun ka dib markii xoriyada la qaatay ee uu soo dhamaystay waxbarashadiisii heer Jaamacadeed isagoo markaasi aad u da'yar. Muj.Cali wuxuu markaa ku soo takhasusay aqoonta Isgaadhsiinta Ciidamada.Waxaa sidoo kale u suurtogashay mudo ka dib inuu waxbarasho kale u tago dalkii Midawga Sofiyeet (Ruushka) la odhan jiray .Muj.Cali (IHUN) wuxuu markii hore ku takhasusay aqoonta Isgaadhsiinta Ciidamada, hase yesshee waxbarashadan isku xigta ee uu u tagay dalkaa Ruushka ayaa u suurtogalisay inuu degree labaad ku soo qaato sida Ciidamada loo degaal geliyo.Wuxuu kasoo qaatay jaamacada Milateriga ee Ruushka ugu caansan lana yidhaa Furuunsa iyo iskuul ciidamada lagu tababari jiray oo Maraykan ku yaallay gobolka Texas oo uu casharo gaagaaban ka qaatay wuxuu takhasuskiisii isu badalay oo uu khabiir ku noqday habka dagaal gelinta ciidanka. Gen.Cali wuxuu ku hadli jiray Shanta luqadood ee uu ku hadli jiray si wanaagsan waxaanay kala ahaayeen;

1. English 2. Arabic 3. Ruush 4. Talyaani 5. Soomaali-

# ***Xoogsi Tagistii Mujaahidka:***

Sidaan korba ku xusnay Muj.Cali Xuseen wuxuu xidigle ka bilaabay magaalada Hargeysa in yar uun ka dib markii xoriyada la qaatay ee uu soo dhamaystay waxbarashadiisii heer Jaamacadeed isagoo markaasi aad u da'yar. Siday dalacaadba dalacaad ugu gubinaysay wuxuu gaadhay darajada Jeneraal.Waxaana u suurto gashay inuu isagoo sarkaal sare oo ciidan ah ka soo shaqeeyo gobolo badan oo ka mid ah dalkii la odhan jiray Somaliya.Wuxuu noloshiisa ku qaatay xero ciidan . Mujaahidku wuxuu guulo la taaban karo ka soo hooyey dagaalkii 1964.Mujaahid General Cali Xuseen waxaa kaloo khibradiisa iyo ruug cadaanimadiisa milaterinimolaga faa'iiday berigii dagaalkii 1977 kii ee dhexmaray dawladii Soomaaliya iyo dawladii Itoobiya .Mujaahidiinta inuu ahaa raggii ugu waaweynaa qoladii dagaalka hor kacaysay wataуna ciidamadii xoreeyay Qabri-dahare, Dhegax-buur, iyo qaar farabadan ee markii danbena Jig-Jiga galay ilaa duleedka Diri-dhaba, ayaa xilligii dagaalkaasi uu Mujaahidku isagoo ciidan xoog leh wata ayaa tuulo ay haysateen ciidankii Itoobiya uu kaga saaray tuuladaasi si la yaab leh, oo gashay runtii taariikhda dadka Milterinimada u kuur gala, oo ay ilaa maanta ku xasuusan


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

yihiin qoladii Taliskii Siyaad Barre ee uu berigii danbe qoriga u qaatay sida laga hayo sarkaal ka tirsanaa ciidamadii Taliskii Siyaad Barre.

Sarkaal Sare oo ka tirsanaa ciidamadii taliskii macangaga ahaa oo ka waramyaa wuxuu yidhi "Haddaba sida uu uga saaray waxay ahayd inuu Mujaahidku isku soo ururiyey gawaadhi tiro badan oo uu tuuladii ku wareejiyey intuu yara kala fogeeyay, kadibna uu u sheegay in xilli habeenimo ay mar qudha (wakhti isku mid ah) laydhka baabuurta shidaan iyagoo mashiinka baabuurtana wada istaadhaya.Markay arkeen ciidankii Itoobiyaankii waxaas oo gawaadhi ah oo laydhka soo shitay oo ku soo socota ayay is yidhaahdeen walaahi ciidan laxaad leh baaba idinku soo socda, iyagoo markaa ka cararay tuuladii ay ku jireen. Taasina ay guul aan nafi ku bixin ay siisay ciidankii uu mujaahidku watay. Halkaasina waxa laga daalacan karaa xirfadiisa milaterinimo".

### *Xilalka uu soo qabtay Mujaahidku*:

Mujaahid Gen.Cali Xuseen xilal sarsare oo dhawr ah ayuu soo qabtay ,aanay ka mid ahaayeen inuu noqday :

1. Taliyaha Ururka Garoowe
2. Taliyaha Guutada 10[aad] ee Beled-Weyne
3. Taliyihii Guud ee qaybtii 21 [aad] ee gobolada dhexe ee dalkoo dhan oo fadhigeedu ahaa magaalada Dhuuso-Mareeb. Mujaahid Gen.Cali Xuseen waxaa xilka kala wareegay dhiigyacabyabka Maxamed Xirsi Morgan xili ku beegnayd 1983kii.
4. Taliyihii Hogaankii Isgaadhsiinta ee Ciidamada xooga dalka oo dhan 1983 [kii]-1988 [kii].
6. Taliyihii Kuliyadii Axmed Gurey ee Ciidamada lagu tabobari jirey.

Markaas oo ahayd xilli Mujaahid Gen.Cali la dhigay buulka iyadoo ahayd maalintii laga qaaday Isgaadhsiinta markii ay SNM weerartay gudaha dalka maadaama uu isagu kasoo jeeday aagaana ay ku aamini waayeen inuu sii hayo isgaadhsiinta uuna sir badan ogaa.Xiligan waxaa khalkhal weyni ku dhacay habsami socodkii awooda ciidan ee keligii taliyihii dalka haystay.

# Ku Biiridii SNM iyo Socdaalkii Mujaahidka:

Janaraalka wuxuu si toos ah ugu soo biiray halgankii SNM xili ku beegnayd 10/20/1989[kii], kadib markuu arkay dhibaatadii uu taliskii Siyaad Bare ku hayay dalka,hawlihii uu halganka uga hayey Xamar gabaabsi noqdeen. Ku biiristiisa SNM waxay miisaan aad u balaadhan ku soo kordhisay halgankii iyo niyadii shacbi weynihii reer Somaliland iyadoo niyad jab aad u balaadhana ku noqotay taliskii Siyaad Barre. Wuxuu mujaahid Gen.Cali si dadban uga qayb qaadan jiray dhinacyada kala duwan ee loo baahnaa sida dhaqaalaha, talo iyo tusaalayn, iwm, xataa heer uu gurigiisu ahaa gole lagu arinsado.


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Mujaahidka wuxuu ugu jiray ururka SNM si dadban ,waxaanaynu marag u soo qaadan karnaa maalintii Axmed Dhagax(IHUN) iyo Aadan Shiine(IHUN) ay baxayeen maalintii ka horaysay gelinkeedii hore guriga gogosha la goglay wuxuu ahaa guriga Mujaahid Gen.Cali Xuseen (IHUN) oo lagu gorfaynayey xaalada dalka iyo sida wax looga qaban lahaa sida uu nala wadaagay Mujaahid Muuse Biixi mar laga wareysaneyey Mujaahid Cali Xuseen (IHUN).

Wuxuu Mujaahid Gen. Cali Xuseen kasoo ambabaxay magaalada Muqdisho isaga iyo saraakiil kale oo reer Somaliland ahayd, halkaasoo uu soo maray khatar aad u fara badan iyo dhibaatooyin badan . Waxaa la socday oo safarkan la soo galay Mujaahidiinta ay ka mid ahaayeen:
1. Col . Yuusuf Saleebaan Faarax
2. Cabdi Xuseen Diiriye
3 Axmed Maxamed kulbunsho
4. iyo Axmed Dareen

Wuxuu Mujaahid Cali la wadagayey taariikh ooy xiligan hawshu kala daadatay loona baahnaa aqoon , geesinimo ,iyo waayo aragnimo dheeraada ku soo biirayey halganka rag sidiisa cuslaa loona baahnaa sida Ibraahim Axmed Ismaaciil, Cabdilaahi Xuseen iimaan (Darawal), Haybe Cumar Magan(IHUN), Maxamed Cali, Carab Ducaale, Muuse Abakor iyo qaar kaloo badan.

Hase yeeshee malaha waxaa mudan inaynu ogolaano in mujaahidka laftigiisu inooga waramo siduu ku soo baxay , waxaanu yidhi isagoo u waramaya Mujaahid Maxamed Baaruud Cali :

"Markii ugu horaysay waxaanu isku keenay afar baabuur oo kala nooc ah , kuligoodna u shaqaynayey hawl kaliya oo soo bixitaankayaga ku saabsanayd, maalintii aanu soo baxaynay saacaddu markay aheyd 6dii ayaanu meeshii aanu ka soo baxaynay baabuurtaa ku soo ururinay midi wuxuu ahaa xaajiyad oo ah kuwa caadiga ah ee magaalada ka shaqeysa , midna wuxuu ahaa gaadhigii aanu ku soo baxnay oo Landcruiser ahaa , ka kalena wuxuu ahaa Zusuki ,midna wuxuu ahaa gawaadhidan yaab (Datsun)ah ee xamar dhexdeeda socda, iyadoo la diidanaa in baabuur landcruiser ahi magaalada ka baxo, ayaanu soo saarnay sarkaal nabad sugida ah kii ugu horeeyey waxaanu soo xaqiijinay nabad sugidu inay ku leedahay dugsi tababar ah magaalada Balcad ,macalimiinta wax ka dhigtaana inay Xamar subixii ka baxdo oo ay duruusta halkaa ka soo bixiyaan 7:30 subaxnimo waa inay ku dhaafaan kantaroolka bas ay wataan,markaa ninkaa sarkaalkaa waxaanu ku nidhi iskugu sheeg inaad tahay nin macalin ah oo ka habsaamay duruustiisii rabana inuu gaadho baabuurkaasi wuxuu ahaa ka landcruiser-ka ah eenu ku soo baxaynay waxaanu ka ilaalinay isaga wax calaamad ah ama shidaal ama safar inuu qabanayo tusaalaynayey waxaanu ku soo baxay sidii baabuur sarkaal ah oo nin kaliyii watay kantarookli horena sidii uu ku soo dhaafay waxay aheyd sidaa aan idiin soo sheegay waxaanu waydiiyey


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

inuu baaburrkii –baskii macalimiinta qaadayey- dhaafay haa baanay ugu jawaabeen mushkilad baa .. kii baan ka daba tagayaa balankaanu ku soo kala tagnayna wuxuu ahaa markuu kaa-kantaroolka koowaad-dhaafo balcad biriijkeeda ….. inuu sidii oo kale yidhaahdo duruus baan soo bixiyey oo shah baan ka soo cabayaa Balcad , kii kale oo wada dhamaan shidaalkii , girgirayaal , faynuusyo , waxaa la socday gabadh iyo dirawalkii oonu ku nidhi socda ilaa aad la kulmaysaan kii hore –landcruisarka- ilaa 40 daqiiqo ayaanu sugnay markuu gudbayna kii saddexaad ayaanu soo daynay waxaanu ahaa datsunka yar baabuurta magaalada caadiga ah marta waxaana la socday aniga iyo nin kaleeto oo sarkaal ah isaguna waxaanu soo qaadanay macamuso iy shaadhadh cad cad oo wax dhibaato ah oo dad safar ah aanay naga muuqan caadina ah anaguna sidaasaan ku soo dhaafnay haddii nala waydiiyo halkeed qabanaysaana dee waad na aragtaan hakeenu qaban lahayn”.

Isagoo ka warmaaya inay is ogaayeen iyo in kale xubnahan mar wada soo wada baxayey ,wuxuu yidhi :” Ragayaga baxaya subaxnimadii uun baa sikugu kaaya horaysay ooy ka dhacday oo adna ma baxaysaa.. rag baa ka shaqeeyey arintaa aan iku kaaya sheegin markaa waaberigii dee meeshii bartii kulanka aanu ka soo dhaqaaqi laheyn ayaa iskugu kaaya horaysay”.

Halkaa markay arin marayso wuxuu sii waday inuu inooga sii sheekeeyo siday u baxeen waxaanu yidhi:“Baabuurtii kii saddexaad iyo kii afraadna sidaasay ku soo dhaafeen waxaa kaloo interesting ah warqad baanu sidanay uu soo qoray mid ka mid ah talisyadaa sare eey lahaayeen odhanaysayna saraakiil baanu soo dirnay soo baadhaya saraakiisha meelaha ay ka baxaan iyo siday u baxaan , kantaroolki warqadii baanu tusnay inaanu nahay saraakiil doonaysa nimakaa saraakiisha ah ee baxsanaya soo socodkaa markaa waxaanu la kulanay dhibaato markaa wadadii aananu … roob badan oonanu ku xisaabtamin anagu ayaa meesha ka da’ay markaa baabuurkii ayaa naga galay waxanay markii danbe nagu qasabtay inaanu habeenkii ku hoyano magaalada Buul Barde dusheeda halkaasuu aad u galay oo uu noo socon waayey fariin dagdag ah oo taakulayn ah ayaanu agagaarka meelahaas ah u diranay waananu helnay jawaabteedii baabuurkiina meeshii waanu kala soo baxnay inta kalena ilaa aanu xadka soo gaadhanay dhibaatooyin badan ayaa nala kulmay ta ug way nee ugu wanaagsanayd waxay aheyd markii aanu maraynay Buqda koosaar oo xero milatari ku taalo inuu xerada horteedii baabuurkii naga galay ma aqaano goor aanu ka saarnay sida runta ah baabuurkii gabigiisiiba waanu qaadnay iyagoo-ciidankii xerada milatari- na arkaayana banaankana dhignay kana soo dhaqaaqnay ta kale ee cajaa’ibka laheyd waxay aheyd markaanu u soo baydhnay xaga xuduuda meeshii ay ciidanku joogeen ee xerada aheyd ayaanu ka baqaynay in lanaga soo daba baxo 30 KM markaanu soconay


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

baaburrkiina aanu ugu wadnay speed-xawaare- aan caqliga galin dhagax iyo wax kastana uu ka boodayey oo gaadhay xataa inuu baatarigii inuu motoorka gudihiisa ku dhaco waanu istaagay waxaananu aragnay meeshaanu soo marnay roob… aad iyo aad u xoog roon madowgeed aad yaabayso ayaa ka da'aysay mida Ilaahay nagu taakuleeyey roobkaas waanu soo soconay ilaa meel xadka u jirta 25 km halkaa markaa waxaanu is nidhi 25km waxba maaha oo dhakhsaad u gudbaysaan laakiin waa jirtay dad aanu meesha kula kulanay oo makii hore na af garan waayey ujeedada aanu u socono dad kaleetana noo maleeyey oo waad iska ogtahay o ninaasi qabaa'ilkii Soomaaliada wuu isku wada diray hubna wuu iskugu wada dhiibay markaa waxay noo qaateen inaanu nahay qabiilkii ay colka ay colka ahaayeen ee hubka la isugu dhiibay muddo ayaanu doddaynay aananu is xaqiijinaynay (cidaanu nahay iyo inaananu aheyn kuwayn na moodayeen) nana ogaadeen inaanu nahay niman u dagaalamaya dadkooda afweynana la dagaalamaya way naga garawsadeen nana soo daayeen nasiib wanaag markaa waxaanu u soo gudubnay meeshaanu u soo jeednay nimidnayna anagoo nabadqabna .Anagu hurdo la'aan iyo gaajo maanu dareemayn intaanu soo soconay laakiin markaanu soo gaadhnay meeshii nabadgalyadadu ku sugnayd inaanu sida dhagaxa u wada daadano , gaahiga laftigiisii ayaa afartii taayirba seexdeen oo halkaa ku banjareen".

M. Baaruud: Marna maka war hesheen wax gurmad ah oo idin soo daba galayadhinaca taliskii afweyne ?

Muj.Cali : waxaanu soo baxnay maalin khamiis ah ,markaa Jimce waa fasax oo la dareemi maayo waxba ee sabtidii ayuu bilaabmay -taliskii meesha haystay- inuu raadco gurmad ah diro amrayna in ciidan laga daba diro oo la raadiyo amarkaana dhamaantii waanu la soconay waananu ogaanay waxaase nasiib wanaag aheyd in isagu uu qaynlinayey in lana soo qabtana uu amrayey laakiin kuwii uu u dirayey hawshu u sheegeen inaananu meel soke joogin eenu talawnay oo ku biirnay halkgankayagii isaga tani naxdin bay u aheyd".

M.Baaruud : Kol hadaad nidaamkaa xun u shaqeynaysay sarkaal sarena kaaheyd markaad halkan timid maxaad kala kulantay kol hadaad markii hore rayi kale ka haysatay iminkana waad timidoo dhex joogtaa ,maxaa rayigaagii hore iska badalay ?

Muj.Cali : Aad iyo aad baan ugu farxay inaan ku soo biiray aad iyo aadna neeftii igu cabudhsanayd neeftii xoriyada wayna i soo gashay markiiba waxyaalo badan oo lagu farxana waan arkay ooy ka mid aheyd gaadhigii ugu horeeyey ee naga hor yimid oo ahaa gaadhi faqashta laga qabsadey oonu joojinay si aanu u aragno iyaga iyo gaadhigaba waxananu ogaanay inay ragii aanu u soconay ahaayeen naguna kaliftay inaanu dhunkano ragii iyo gaadhigii ,anagoo kaayagiina dhunkanay nana waydiiyeen


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

sababtaan u joojinay waxaananu u sheegnay inaanu hubsano ciday yihiin ..waxaanu aragnay kuna faraxnay in gaadhigii ummada ee loo adeegsaday in lagu gumaado uu maanta saaran yahay ciidan ugu adeegaya ummada .

Baaruud: kol hadaaad maanta aragtay quwadii jabhada , soona aragtay quwadii taliskaa Ilaahay uuun baa og wax iman doonee rayigaaga maxad ka qabtaaa sidee bay isku keen hortaagi doonaan markay ciidanka snm-ta iyo ciidanka afweyne iska hor yimaadaan maxaad filaysaa?

Muj.Cali: way cadahay ciidanka afweyne ma laha moral oo nin la yidhi dil ni xaqiisii ku dagaalamaya markaa ciidan aan fahansanay wuxuu u dagaalamayo caqligana ku haysta nin kursiga ummada Soomaaaliyeed kaga fadhiyey sabab la,aana kaga fadhiyey ..ninkaasi niyadiisa iyo moralkiisa waad garan kartaa adigu .. markaa waxaan garanayaa sheekana ku hayey inaan goob kastoo layskaga horyimaadaba aanay qaadan shan daqiiqadood .waa ciidan xaq ku dagaalamaya iyo ku gar daro ku dagaalamaya waxaanan filayaa inaanu ka guulaysan doono sidii ay horeba u guulaysan jireen anaguna aanu sii kordhin doono oono xoog uga guulaysan doono insha Allah kariin sidaasay noqon doontaaa

Baaruud : kol hadaad tahay ninmadax ah dadkuna ka danbeeyaan dhalinyaruna ixtiraamto maxaad fari laheyd?

Mujaahid Cali : waxaan dhalinyarada iyo umada fari lahaa marka ugu horaysa niyadoodi adkayd ee ay ku dagaalamayeen halkii ka sii wadaan halgankana wuxuu marayaa marxaladii ugu danabaysay uun adhawrkii agaaalo ee meesha jiray uu ku xerooday awoodiisiina noqontay kuwaas uun daafac inta uga hadhay waa wax yar dhawr saacadood oo dagaal ah ayaa inoo hadhay ee dhawr sanaadood ma hadhin waxaanan leeyahay umada degan woqooyi iyo inta iangu soo iirtayba waxba ma dhina in lagu guulaysto waxay u baahan tahay in laga baxo waxyaabahan yaryar ee weerer baan qaaday oo reerki baanan yara gaadhayaa geelii baan soo waraabinayaa laga gudbo oo saddex saacadood oo dagaal ah ayaa inoo hadhay ee ha la galo..

# ***Dibuhabayntii SNM:***

Markii ay dhamaatay soo dhaweyntii SNM soo dhaweysay waxa uu usoo gudbay Xaruntii SNM ee Magaalada Baligubadle.General Cali Xuseen waxa uu Bali-Gubadle kula kulmay xaalad adag oo u baahan in laga wada tashado.Waxaa xiligan lagu jiray xili dibu habayn lagama maarmaan aheyd,loona baahnaa si looga gudbo ku dhufoo ka dhaqaaqdii , war isgaadhsiinta dhamaan qaybaha kala duwan


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

ee ciidankana la isku xidho.Xaaladaas oo ahayd in la diyaariyo isla markaasna la dardargaliyo hawshii xooogaga SNM sidi loo waajihi lahaa cadawga .

Hadaba General Cali Xuseen(IHUN) waxa markuu kula kulmay Baligubadle saraakiisha ciiidamada iyo hogaankii sare ee SNM waxa uu soo jeediyay isagoo adeegsanaayay khibradiisa dagaalka iyo waaya aragnimadiisa ciidan dibna ciidanka u xasuusiyey in aynu dhamaanteen leenahay ujeedo qudha oo ah sidii maatidan guryahooda loogu celin lahaa loogana saari lahaa faqashta haysta dalkoodii .Waxaana la galay abaabul ciidan iyadoo loo diyaar gareeyay dhawr saldhig oo lagu tababaro mujaahidint cusub .General Cali Xuseen wuxuu dalbaday in loo ogolaado isku dubaridka guuto khaas ahayd looguna magacdarayey mutacilmiintii ugu horaysay ee lagu xidhxidhay gobolka waqooyi galbeed 1982[kii] ee UFO. Diyaar garawgaa iyo tabaabushaas ka dib waxa laysku qaybiyay in la soo galo Burco iyo Hargeysa Ale ha u narsiitee General Cali Xuseen isagoo wata Guutadii khaaska ahayd ee UFO iyo ciidamdii kaleba waxa uu qabsaday Magaalada hargyesa inteedii badnayd.

ka dib mujaahid Cali Xuseen waxa uu ku laabtay magaalada xarshin oo uu xaskiisu degenaa halkaa oo uu mudo ku sugnaa ila laga doortay Cabdiraxmaan Axmed Cali . Markii la doortay Marxuun Cabdiraxmaan Axmed Cali waxa uu dib u habayn balaadhan ku sameeyay ciidamdii SNM isagoo sameeyay gudi ka kooban shan xubnood oo uu gudoomiye uga dhigay General Cali Xuseen mudo sadex bilood gudahoodna waxa uu kaga wareejiyay Cabdiraxmaan qaybintii iyo qorshayntii saadka iyo taakulaynta taliska guud ee SNM oo uu abaandule u ahaa Carab Ducaale .
.
Hadaba General Cali Xuseen waxa uu soo diyaargareeyay kaartadii dalka lagu qaban lahaa isagoo fadhiyadi ciidamada SNM u qaybiyay 6 goobood wuxuuna ku kala cayhimay waajibaad koodii dagaal oo kala ahaa 3 weerar 2arbush kyo 1jidgooyo sidaasanaa wa ugu fududaatay ciidamdii SNM in ay gacanta ku qabtaan goboladii waqoooyi laguna guulaysto kaartadii dagaal ka ee jeneralu usoo diyaariyay..

Gen. Cali Xuseen wuxuu ahaa geesi u tafa-xaytay in ay Somaliland xorowdo, markii waddanka lagu soo noqdayna wuxuu ahaa Gudoomiyihii gudida dagaal gelinta ee SNM oo Gudoomiyihii SNM Cabdirahman Axmed Cali (Tuur) Ilaahay how naxariistee uu sameeyay si ay qaybihii kala go'naa ee SNM si wada jir ah waddanka u wada xoreeyaan.

Mujaahid Gen. Cali Xuseen wuxuu ka soo ciyaaray door aad u balaadhan xoreyntii Somaliland isagoo ka masuul ahaa qorshihii ugu danbeeyay ee Berbera lagu qabsaday isagoo adeegsanaya halku dhegii uu ku caano maalay aadna loogu xasuusto ee ahaa "waar colka kaarto ma lagu dayay", qorshahaasna waxaa si geesinimo leh u fuliyey ciidamadii iyo saraakiishii sar sare ee SNM, waana tii Ilaahay SNM ku siiyey guusha, kagana saareen dalka ciidamadii taliskii Siyaad Bare daacada u ahaa.

Halku dhegan uu Mujaahid Gen.Cali ku hogaamiyey ciidamadu wuxuu ku yimid iyadoo la doonayo in Magaalada Berbera la qabsado jid gooyana lagu sameeyo waddada Hargeysa iyo Berbera u dhaxaysa, ayaa ciidankii SNM oo ku diyaar garoobaya meel aagaas ku taalla oo uu Taliskii Guddidii degaal gelinta fadhiigoodu ahaa, ayaa wuxuu Mujaahid Cali Xuseen ka jeediyay khudbad runtii ku beertay mujaahidiintii yididiilo, sawaxan, iyo


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

sacab kala joogsan waayay. Mujaahid Cali Xuseen wuxuu yidhi "Yaa garanaya sida uu ku yimi erayga "Colka wadhaf ma lagu deyay?", nin mujaahidiintii SNM ee dhegaysanayay Mujaahidka ayaa gartay oo cadeeyay inuu ahaa in beri laba beelood oo isku laayay aagagaa Lafaruug, uu beeshii laga adkaaday ku jiray nin doqon loo haystay oon waxba laga dhegaysan jirin uu dadkii iyagoo xal u la'aa sidii ay iskaga caabiyi lahaayeen beeshaa kale uu ku dhawaaqay "waar colka wadhaf ma lagu deyay?" halkii baa lays eegay oo la yidhi walaahi waa runtii.

Haddaba ninkii mujaahidka ahaa markuu dhameeyey ka xogwaranka arintaa ayuu Muhaajid Cali yidhi "haddaba maanta inaga soo qaada beeshaa markii hore laga adkaaday ee imika duulaanka qaadaysa si ay u soo guuleysato, anigana waxaad iga soo qaadaan ninkaa nacaska ahaa oo waxaan idin leeyahay "Waar Colka Kaarto ma lagu deyay!", kaarto inoo shaqaysa oo qorshe dagaal oo aynu isla ognahay ma ku deynay horta".

Halkii baa dareen muujinaya in loo riyaaqay ,rajo cusubna ku beertay ciidamadii ,iyadoo yididiilo hor lihi saaqday lana moodayey in furihii guusha farta laga saaray.

# Milgo iyo Maamuus:

-1964 dagaalkii lala galay Xabashida waxaa lagu siiyey bilad geesi .
-1977 dagaalkii lala galay Xabashida waxaa lagu siiiyey bilad geesi.
-Wuxuu noqday mujaahidkii darajo heerkaa ka gaadhay aqoon ciidameed kuna biiray halgamaagii SNM.
-Waxaa lagu siiyey shahaado sare bishii Juun 20, 1975 ,ka dib markuu dhamaystay waxbarashadii dagaal gelinta ciidanka kana qaatay jaamicada ugu weyn wadankii midawga Soofiyeet ee lagu tababari jiray saraakiisha khaaska ah ee ciidamdii WAARSO ,erayadana baana ka mid ahaa kuwii ku xardhanaa shahaadaaa:
"……M.V.Frunze Military Academy "Having specialized in COMMAND AND STAFF, OPERATIONS AND - TACTICS, COMBINED ARMS DUTIES, by the special decision of the State Examination Commission of 20 June 1975 he qualifies as officer with higher Military Education………".

-Waxaa loogu magac daray dugsi ku yaala Burco (Dugsiga General Cali Xuseen):
Waxaa mudan in la sheego ka dib dhimashadii Jeneraal Cali Xuseen sanadkii 2003-dii in magaalada Burco laga sameeyay saddex xaafadood oo loogu magac daray mujaahidiin SNM ahaa oo dhamaantood geeriyooday. Saddexdaa mujaahid oo kala ahaa Aadan Saleebaan, Cabdulqaadir Koosaar, iyo Jeneraal Cali Xuseen.




Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Fu,aad Sh.Abuubakar Ismaaciil
Bahda Mareegta Farsahxan

# Jid,Jidiin,iyo Jihaad ma la wadaagtay Mujaahidka:

Kol hadduu Mujaahid General Cali noloshiisa inta ugu badan ku qaatay xero ciidan,waxaa ugu dhawaan kara oo noloshiisa dhib iyo dheefba ay wada calfadeen saraakiishii kale ee iyaguna waqtigooda xero milatari ku hanoqaaday .Waxaa bahda mareegta farshaxan u suurogashay dadaal farabadan ka dib in Maxamed Cabdi Ilig oo ka tirsan hormoodka warbaahiyaha maqalka iyo muuqaalka ee horn cable TV ee ku yaala caasimada Soomaaliland magaalada Hargeysa uu wareysiyo ka qaaday dhawr Mujaahid .Waxaa runtii ah arin mudan sheegisteeda in ay dhamaan mujaahidiintu si furfuran kana muuqatay farxad , jaceyl iyo ixtiraam ay u hayeen Mujaahid General Cali (IHUN) si raganimo lehna u ogolaadeen ka waranka Mujaahidka.

## Mujaahid Muuse Biixi Cabdi:

-Guddomiye xigeenka koowaad ee xisbiga kulmiye -

Mujaahid Muuse Biixi oo ka mid ah ragga ay in badan jid ,jidiin iyo jihaadba wada galeen , ahaana dhalinyartii tilmaan iyo hogotusaalayn ka qaadan jiray Gen.Cali Xuseen ayaa ku bilaabay hadalkiisa mar laga wareystay xidhiidhka ka dhexeeyey isaga iyo Gen.Cali :
“ Xafiis la odhan jiray hoggaanka xidhiidhka dibedda, labadayada waaxood baa isku dhawaa, dabadeed markaas ayaanu leenahay wada-shaqayn iyo isku dhawaansho. Dabcan markaa waxaanu noqonaynay Wiil iyo aabbihii oo kale oo wuxuu noo ahaa Oday weyn oo dhinac walba talada iyo odaytinimada, hadday Siyaasad tahay, hadday dhaqan tahay iyo hadday Shaqo tahayba laga wada tashato ama Odayaashii waawaynaa ee lagu soo hiranayay. Raggii ay Odayaasha wada ahaayeen ee aanu talada ka qaadan jirnay waxa ka mid ahaa Nin la odhan jiray Cabdilaahi Kaahin oo hayay hoggaanka Maamulka Lacagta, Maxamed Xaashi “Lixle”, Nin imika qaybtan bariga jooga oo la yidhaahdo Maxamed Cabdi Macalin oo joogay hoggaanka Siyaasadda. Waqtigaa waxay ahayd siddeetamaadkii markii UFO la xidhay ee muddaharaadyadu Hargeysa ka socdeen, markii Xoolaha Dekedda lala wareegayay ee dadka inta dhibaatadu gaadhay ee la xidhay ama la dhacay mooyee, intayadii Xamar joogtay ama Dawladda halbowlaheeda ku jirtay uu soo gaadhayay warka dhiillada lehi, dabadeed waxa la yidhi maxaa la yeelaa? Markay u badnayd waxay ahayd maxaa la yeelaa? Markaa waxay ahayd markii la guuxayay ee Saraakiishu lahayd halkaynu wax ka qabaa? Waxaan xusuustaa maalmihii ay baxayeen Axmed-Dhagax (IHUN)iyo Aadan Shiine (IHUN) ee ay bari oo kale ay bixi doonaan, maalintaa gelinkeedii hore waxaanu joognay Guriga Gen.Cali Xuseen. Maalintaa oo waar maxaa la yeelaa lagu gorfaynayay. Markaa halkaas ayaanu ka soo wada bilownay arrimaha, halganka iyo dagaalka. Markii dambe anagu waanu ka soo hor baxnay, isaga iyo rag kale waxay noo yimaaddeen sanadkii 1989-kii aakhirkiisii ama 1990-kii bilowgiisii. Isaga oo Nin wayn oo da’ ah oo malaha 70-jir ku dhaw. Isaga oo da’daas ahna waa kii Qoriga qaaday ee Dagaalka nala soo galay ee Hargeysa dagaalka ku soo galay ilaa uu ka xanuunsanayay. Waxay ila tahay wuxuu ka mid ahaa


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

-Gen.Cali Xuseen, -Waraabe-cadde, -Xasan Cabdule “Xasan Kayd”
- Haybe Laambad, - Gabaax -iyo kuwo kale
waxay ahaayeen raggii iyagoo da' ah oo kuwii waadhka geli lahaa ah hubka qaaday ee dalka dib u xoreeyay. Waxaan ku aqaanay Nin wanaagsan oo sakhi ah, dadkana ururiya, bashaash ah, kaftan badan, isla markaana halka uu joogo had iyo jeer lagu soo hirto. Wuxuu aad u yaqaanay Af-Carabida, dabadeed markay isaga iyio Ilaahay ha u naxariistee Axmed Dhagax is-helaan waad yaabaysay siday Carabida ugu hadli jireen.

Mujaahid Muuse Bixi isagoo ka waramay siday isku barteen Gen.Cali xuseen ayuu yidhi “ Markii hore ee aanu dhawr iyo toddobaatankii aanu Ruushka nimi ee aanu ciidanka soo galnay, isagu wuxuu ahaa Kornaylladii ka muuqday ciidankii xoogga dalka Soomaaliyeed. Markii Dagaalkii 1977-kii socdayna waxaanu isu baranay si shaqsi ah oo Xamar baanu isugu nimi, markii aanu labada Xafiis ee isku mid ah noqonayna waxaanu isku baranay nooc siyaasi ah oo waxay ahayd markii ay socotay sidee dadkii Somaliland ama Isaaqiiba waa la dhibay oo gam baa laga siiyey ee maxaa la yeelaa. Odayaashii xaggooda loo yaacay ayuu ka mid ahaa ee arrin iyo adduunba laga sugayay. Markii dambena waxaanu isku baranay mid halgan, Aniga, Ninkii dhawaan dhintay ee la odhan jiray Jaamac Cali Cilmi oo joogay Xafiiska Cilmi-baadhista, Nin Food la odhan jiray oo Maraykanka ku dambeeyay oo ahaa nin hawshaa aad uga qayb galay oo u shaqeeyay, Cabdilaahi Askar, Cabdilaahi Kaahin iyo Rag kale,waxaanu noqonay Kooxdii Xamarba oo Anagaa Xaruntii waynayd joognay ee Cali Samatar hoostiisa ah, markaa halgan baanu isku baranay aan qarsoodi lahayn”.

## *-Ibraahim Cabdilaahi Xuseen (Dhego-weyne):*

-Xubin ka ha urur siyasdeedka UDHIS ee cusub sarakishiisa xisbiga kulmiyeena ka hayamay dhawaan ah-

“Kolay Taariikhda Cali Xuseen way badan tahay, markii uu Dugsiga ka baxay wuxuu dhammaystay sanadkii 1961-kii isaga oo soo dhammaystay Kuliyaddii War-Isgaadhsiinta, dabadeed Sarkaal buu noqday oo muddo badan ayuu ciidankii Soomaalida ahaa. Markii dambe wuxuu galay Kuliyad Akaademi Ruushka ah oo middii ugu qiimaha badnayd ahayd oo la yidhaahdo Furuunsa oo uu ka soo baxay. Wuxuu ahaa Nin tacliinta ku wanaagsan oo aqoontiisa Milatarinimo aad u sarayso, berigii dambena Ciidankii Dagaalkii 1977$^{kii}$ ayuu isaga oo Kornayl ah halkaa ka soo baxay oo wuxuu haystay qaybta 21$^{aad}$, Ciidankii soo jiidhay Qabri-Daharre, Dhagax-buur ee ilaa Jigjiga soo galay ayuu watay, markii dambe ee dagaalka laga soo baxayna hoggaanka War-Isagaadhsiinta ayuu hayay in badan. Isaga oo kollay xilal badan soo maray Taliye qaybeed, Urur, Guuto, Ciidamo badan ilaa qayb iyo markii dambe uu noqday Madax Hoggaan. Intii ka dambaysayna Xilalkaa waawayn ayuu hayay oo waa Saraakiishii waawaynaa ee Kuuliyadaha waawayn ee Magaca leh ka soo baxay. Cali markii dambena Halgankii SNM ayuu ku soo biiray oo uu wax wayn markii dambe ka taray ilaa iyo qabsigii Berbera ugu horraysay raggii hoggaaminayay ee Taliska Ciidanka iyo guddigii Dagaalkaa loo sameeyo la shaqaynayay ee Dagaalkii u dambeeyey ee xoraynta ku jiray ayuu ahaa, Odayaashii aqoonta ahaa ee Talisyada aqoonta


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

u lahaa ayuu ahaa. Ilaa iyo Dagaalkii Berbera wuu na sii raacay. Waa nin wax wayn ka taray oo meeshii uu galena aqoon iyo waxtar ku kordhinayay, ragga aqoonta Milatari loo daba fadhiistana wuu ahaa".

Mar la waydiiyey Mujaahid Dhegoweyne siday isku barteen iyadoo da' doori u dhaxeysay iyo siday u kulmeen Gen.Cali ,wuxuu yidhi:
" Kolay waanu is-naqaanay, laakiin waxa isugu kaa horraysay wada-shaqayn aanu wada shaqayno ilaa 1972kii iyo 1973 kii markii qaybta 21 aad la keenay Aniga oo Taliye guuto ka ah ayaa isna Taliye Qaybeed laga soo dhigay, markaa Dagaalladii qaybtaa dhexe ka socday ayaanu isugu nimi, markaas ayaana is-dhex-galkayagu isugu kaaya horraysay ilaa muddadaasna si wacan ayaanu isu naqaanay".

Mujaahid Dhegoweyne ayaa hadalka ku sii daray mar laga wareystay xilalkii kala duwanaa ee uu Gen.Cali ka qabto dawladii keligii taliyihii Siyaad Barre,wuxuu yidhi: "Dagaalladii 1977kii ee Afweyne wuxuu hoggaaminayay ciidankii soo qabsaday Qabri-Daharre, Dhagax-buur ilaa Jigjiga, markii dambena Ciidankii SNM ayuu ahaa oo xilal badan ayuu ka soo qabtay. Wuxuu ahaa nin muddo dheer Ciidanka ahaa oo ilaa 1961kii Sarkaal buu ahaa".

Mujaahid Dhegoweyne oo sii wata hadalka kana jawaabayey su'aalo dhawr ahaa ayaa yidhi: " Wuxuu noo yimi sanadkii 1989kii Saraakiishii waqtigaa timi ayuu ka mid ahaa. Ilaa dhammaystirkii wuu ka qayb qaatay, Saraakiishii Xamar ka timi ayuu ahaa ilaa iyo dib-u-xorayntiina wax badan ayuu ka soo qaatay, intii uu Xamar jirayna nin wax badan taray buu ahaa oo Nin uu War u soo diro, Saraakiishii waqtigaa joogay isku mid ma ahayn. Cali Xuseen wuxuu ahaa Bani'aadamka dadka ugu bulshaysan ee aanay cid Islaam ah is-diidin oo haddii umad kasta loo geeyo Cali Xuseen isaga oo ka qoslinaya ayaad arkaysay, waxaad is-odhaynaysaa Jin iyo Insiba wuu Af-yaqaanay, waxaanu ahaa dadka Luqadaha yaqaana. Isaga iyo Axmed-Dhagax waxay ahaayeen ragga umadda ay 10 cisho la joogaan afkooda ku hadli jiray. Nin caqli badan ayuu ahaa oo dabeecaddiisu aanay qofna ka cadhaysiinayn ee dadka dhex gala oo cid walba la nool. Markaa wuxu ahaa Shaqsiyad aan la helayn oo cajiib ah".

## *Mujaahid Maxamed Kaahin Axmed*:

- afhayeenka xisbiga mucaaridka ah ee kulmiye-

"Ilaahay ha u naxariisto Muj, Cali Xuseen, wuxuu ahaa Saraakiishii ciidamada anaga aad buu nooga waynaa oo raggii Lixdanka bilowgiisii isaga oo Sarkaal ah dibedda ka soo noqday dalalka Carabta oo markii hore Qaahira ayuu wax ku soo bartay, muddo dheer ayuu ka mid ahaa ciidamadii la odhan jiray Ciidamada xoogga Dalka Soomaaliya ee wasaaraddii Gaashaan-dhigga. Waxa markiisii hore loo soo tababaray Sarkaal War-Isgaadhsiineed, muddo ayuu xukumayay qaybta dhinaca War-Isgaadhsiinta ee Xarunta Gaashaan-dhigga Cirka. Cali Xuseen wuxuu ahaa nin firfircoon oo aad u degan, wuxuu ahaa nin kaftan badan oo dadkan dadka la qabsan kara ee aan meel qudha ku xidh-xidhnayn ayuu ahaa. Dadku had iyo jeer waxay yidhaahdaan Milatarigu waa wax kakan oo ad-adag oo amar uun meel la jooga. Cali Xuseen wuxuu ahaa nin aqoon Milatari leh, aqoontiisa guud ee cilmina ay dhisan tahay oo hogaamintiisu aad iyo aad u debecsan tahay, waxaanu ahaa dadka maskaxda fiican ee wax walba qabta.


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Fu,aad Sh.Abuubakar Ismaaciil
Bahda Mareegta Farsahxan

Inkastoo loo soo tababaray Sarkaal War-Isgaadhsiineed, haddana wuxuu noqday qaybaha kale ee Ciidamada, ,gaar ahaan kuwa Dhulka oo uu wax ka xukumay. Markii dambe, markii uu muddo shaqaynayay oo ku soo dhawayd xilliyadii inqilaabkii Maxamed Siyaad Bare uu dhacay ayaa tababar dambe loogu diray Akaademiyadii sare ee Ruushka, markaa wuxuu wax ku soo bartay Akaademiyadda ugu wayn ee Dawladihii hanti-wadaagga ahaa ee reer Bariga-WAARSO- ciidamadooda lagu tababari jiray oo aad caan u ahayd. Markii dambe Furuunsi Akaademi oo Moosko ku taala ayuu tegay, markii uu soo noqday Xarunta Gaashaan-dhigga waa laga kaxeeyay oo qayb la odhan jiray qaybta 54^aad ayuu joogay oo Garoowe ayuu tegay, markii dambena Beledweyne ayaa la geeyay oo Taliyihii Guutada 10^aad ayuu noqday, markii dambe wuxuu ka qayb galay Dagaalkii 1977^kii ee Itoobiya iyo Somalia, waxaanu ka mid ahaa Ciidamadii xoreeyay Jiidda War-dheer ee guulaha degdegga ah gaadhay. Markii Dagaalkaa laga soo noqday waxa looga maarmi waayay War-Isgaadhsiintii oo isku dhex daadatay oo isku-habaynteeda loo baahday, waxaana la geeyey Xaruntii Gaashaan-dhigga ee Muqdisho. Runtii Cali Xuseen wuxuu ahaa nin Ciidanka iyo Xaasaskooda u roon oo xukunkiisu furfuran yahay .

Isla markaana kaftan badan. Xilligii u dambeeyay halganka waa kii ka soo qayb galay, markii ay halganka ka soo qayb galeen rag badan ayay ahaayeen, Ibraahim Axmed Ismaaciil oo raggii Ingiriiska wax ku soo bartay , Cabdilaahi Xuseen iimaan (Darawal) , Haybe Cumar Magan , Maxamed Cali ayaa ka mid ahaa oo ahaa Ninkii Jiiddan galbeedka ku dhiman jiray isaga oo Wasiir-ku-xigeenka Gaashaan-dhigga ah, Carab Ducaale ayaa ka mid ahaa, Muuse Abokor ayaa ka mid ahaa….Rag faro badan ayay ahaayeen oo aan la soo koobi karin. Xilligaa oo aynu wada xusuusanahay in dagaalkii 1988^kii ee cuslaa ee Magaalooyinka la galay sida Burco iyo Hargeysa, markaasna uu Dagaalk ku fiday Waqooyiga Hargeysa ilaa Xeebta Lughaya, dhinacana jiidda Berbera ilaa Dacar-budhuq , xagga Burco uu ilaa Sanaag laamiga ilaa Caynabo, Buur-dhaab, Ceel-Afweyn, Gar-adag, Buur-dhaab, Ceerigaabo, Xiis, Mayd, Xeebta Berbera Galbeedkeeda, Xeebaha Lughaya uu u fiday. Markaa xilligaa daal fara badan baa jiray oo khasaare fara badan ayaa na soo gaadhay oo Saraakiishii heerka dhexe ee Taliyayaashii ayuu khasaarahaasi saamayn ku yeeshay, dhaawac fara badanina wuu soo gaadhay. Run ahaantii xilligaas ay raggaasi yimaadeen waxay ahayd marxalad adag oo kala-guur ah oo markaa dhaawac fara badan iyo dhiig-bax badan jiray, markaas dhiig-baxii soo gaadhay SNM waxa dhiig cusub ku shubay oo aqoon cusub, Xoog dihin, Aqoon Ciidan oo Saraakiil sare ah oo firfircoon raggan cusub ee yimi oo uu ka mid ahaa Cali Xuseen oo Odaygoodii ahaa, Sarkaalkoodii u waynaa oo aqoon leh, waayo-arag ah, Cilmi-Milatari ahaanna diyaarsan. Iyaga ayaana firfircoonni geliyay daalkii ku jiray SNM, dabadeedna xorayntii Taliskii nacaska ahaa dalka iyo Shacabka lagaga xoreeyay Cali Xuseen wuxuu ahaa raggii hormoodka ahaa ee dejintii qorshihii dagaalka, hoggaamintiisii, abaabulkiisii iyo isku-xidhkoodii qaybta Libaax ee lama ilaawaana ka qaatay. Wuxuu ku suntan yahay raggii Halgankii SNM qaybta Libaax ka soo qaatay ee Ilaahay Naxariistii Janno ha ka waraabiyo. Wuxuu ka mid ahaanayaa Geesiyaasha keenay xorriyaddan aynu ku naaloonayno oo mar Xorriyaddu gaadhay in la yidhi SNM ayaa Go'yaal Shaal ah sitay oo Magaalada soo galay, markaas ayaa la yidhi Go'yaasha Shaalka ah lama qaadan karo. Tagsiilayaasha ayaa Ateenooyin dhaadheer lagu xidhay, dabadeed waxa la yidhi waa Ateenooyin ay SNM kula xidhiidhaan, markaas ayaa la yidhi laguma xidhi karo


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Baabuurta. Hablaha waxa loo diiday inay Dahab qaataan, dhalinyarada waxa loo diiday in ay xarragoodaan..dabcan Dagaalkaasi ma ahayn mid caqli-darro lagu galay, mid Ciyaar loo galayna ma ahayn ee Lafahaa qaaliga ah ayaa ku baxay. Waxa jiray Taliskii Kaligii taliyaha ahaa ee go'aankii iyo taladii uu qaatay ay ahayd in si axmaqnimo ah loo laayo dadkan. Maantana waynu arkaynaa midhihii Xorriyadeena, waxaana Guryaha Tuulo walba ka dhisan Khudaarka looga dhex goosanayaa waa Geessiyaashaa u shahiiday ee uu Cali Xuseen ka mid yahay..waxaanay ku suntanaanayaan Taariikhda Somaliland, mustaqbalkana Caruurteena iyo dadkeena loo dhigayo.

# ***Halgankii Ka dib:***

Markii wadanka la xoreeyay, Muj.Jeneraal Cali Xuseen, muu doonin kumana hamiyin inuu xill wasiirnimo helo ee wuxuu degay magaalada Sheekh iyo halkii uu ku dhashay kuna koray . Waxaa mujaahidka guul u aheyd inuu erayadii uu yidhi markii uu gaadhay magaalada Xarshin lana hadlayey ciidamadii "Hawsha ugu weyn ee ina hortaalaa wa inaynu dadkan qaxootiga ah ku celino dhulkoogii" uu Ilaahay ku guuleeyey,iyadooy ku ladhnayd farxadii u dareemay in dhamaan dadkii degayey wadanka Somaliland go'aansadeen inay si nabad ah u wada noolaadaan iyagoo isla ogolaaday inay xornimadoodii dhacantay la soo noqdeen. Wuxuu mujaahidku ka qayb galay shirarkii Burco ,Boorama ,iyo Berber ee aayaha ummada Somaliland laga tashanayey.Waxaa kaloo mudan xusid in mujaahid Cali ,Mujaahid Haybe Cumar iyo Mujaahid Axmed Jaambiir ay ka qayb galeen heshiiskii SNM iyo Itoobiyaanku ku kala saxeedaan Wajaale ,maalmo ka dib soo galidii hanashadii dalka. Isagoo markii danbena u soo boqoolay wadanka Maraykanka oo uu deganaa wiilkiisa Jamaal Cali Xuseen. Mujaahidku muddo ayuu xanuusanayay markii danbena wuxuu codsaday inuu waddankii ku noqdo, waxaanu deganaa magaalada Hargeysa ilaa maalintuu ka dhimanayay January 23keedii 2003,isagoo ku geeriyooday magaalada Hargeysa.

Maalintaa uu Muj Jeneraal Cali Xuseen dhintay waxaa magaalada Hargeysa uu madaxweyne Riyaale kaga dhawaaqay baroor diiq socotay todobaad oo maalin walba taariikhdiisii iyo duco raadyowga magaalada laga sheegi jiray. Waxaa loo aasay si heer qaran, waxaana xabaashiisa dul taagnaa dhamaan mujaahidiintii SNM iyo dadweynihii magaalooyinka Hargeysa, Berbera, Sheikh, iyo Burco isagoo lagu aasay magaalada Hargeysa. U malayn maayo inay cidi ka maqnayd aaskiisii. Cali Xuseen waxaa ay Jariidaduhu qoreen waxqabadkiisii iyo taariikhdiisii oo kooban.

Muj Cali Xuseen wuxuu yeeshay laba xaas Faadumo Nuur iyo Sahra Dubad,waxayna u kala dhaleen siday u kala horeeyaan wiil iyo gabadh oo kala ah Jamaal Cali Xuseen, iyo Ayaan Cali Xuseen. Waxa kale oo nool walaalkii Axmed Xuseen "shaadh cade" degana magaalada Sheekh iyo Cabdillaahi Aadan Dheere oo maanta degan magaalada Laas-Caanood oo ay isagana Cali Xuseen xagga hooyo walaalo ka ahaayeen. Cali Xuseen waxaa mootan 3$^{dii}$ kale ee ay walaalaha ahaayeen oo kala ah Dabar, Fanax, iyo Axmed Aadan Dheer.


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

# Maxaa lagu xusuustaa:

- Wuxuu ahaa nin qosol badan oo sheekooyinka qosolkana jecel - Wuxuu ahaa nin aan hadal badnayn, laakiin markuu hadlo hadal miisaaman ku hadla - Wuxuu ahaa nin geesi ah oo ay askartiisa, iyo asxaabtiisu aad u jeclaayeen, sida uu ii sheegay Kornayl Cabdirisaaq Isaaq Biixi oo uu Cali Xuseen taliye u ahaa, inuu Cali lasoo bixi jiray dabeecad ka duwan tiisa markuu degaalku socdo oo ku tusaysa adayg, kalsooni. Halka marka caadiga la yahay aad arkaysid isagoo qoslaya oo dadka dacaayadeeynaya.
- Wuxuu ahaa nin la dagaal geli jiray askartiisa oo aan ku ekaan jirin uun command centerka. Waxaa jirta in beri ay gabadhi ugu buraanburtay magaalada Qabri Dahare mar uu watay ciidankii xoreeyay 1997kii degaalkii xabashida iyo soomaalida, iyadoo markaasi tidhi "Kornayl Cali Xuseenow saajinimo Ilaah ku sii" maadaamu uu berigaa kornayl ahaa iyaduna ay u haysatay inuu saajinku ka sareeyay kornaylkan aanay weligeed maqal. Aagaas oo dhana waa laga yaqaanaa inuu yahay ninkii watay ciidamadii ugu horeeyay ee Soomaaliyeed ee xoreeya berigaas.

-Cali Xuseen xataa xilliyada uu fasaxa yahay wuxuu daawan jiray filimaanta degaalka oo marmarka qaarkood saraakiisha yar-yar casharo kuba siin jiray.

-Cali iyo mujaahidiin uu ku jiro ayaa mission khatar ah kaga soo baxsaday magaalada Muqidho si ay SNM u soo galaan (taa waad haysaa oo waraysigisii waad haysay oo inaan wax badan ka idhaahdo maaha)

- Baxsitaankaa uu soo baxsaday waxay siisay SNM niyad weyn, Siyaad Barrena waxay ku noqotay niyad jab aad u balaadhan. Wuxuu ahaa ninkii ugu jago sareeyay xagga Milateriga ee kasoo goosta Siyaad Barre isagoo gaadhay jagada Taliye Qaybeed ( saddexdii qaybood ee ciidanka Soomaliya lahaaba), amaba Hogaan dhan oo ciidamada ah haysta.

- Taasoo keliya maahee Cali Xuseen wuxuu in badan la degaalamayay wadanka Itoobiya. Maalintii uu soo galay madaafiic baa loo riday,waxaana isla markiiba loo geeyay Mingiste Xalyle Maryam, maadaama ay Itoobiyaanku aad u yiqiineen. Taasi waxay siisay yididiilo aad u balaadhan.

- Markii uu SNM galay, waxa Cali codsadey in loo dhiibo ciidan isku jir ah oo aan ahayn ciidan beeleed oo ay isku keeneen dhalinyaradii UFO, Ibraahim Maygaag ,iwm.

-Markii Guddoomiyaha loo doortay Cabdiraxmaan Maxamed Cali (Tuur), wuxuu ka dhigay Mujaahid Gen. Cali Xuseen taliyaha Guud ee degaal gelinta ee SNM, waxana gacanta laga saaray inuu noqdo Guddi gaar ah oo loo saaray inay si midaysan loo xoreeyo waddanka. Sida la sheegay Cali Xuseen iyo guddidii waxay u qorsheeyeen in si wada jir ah markii ugu horeysay ay ciidan beeleedkii SNM noqdaan qaar wadda socda, waddanka marka ugu horeysa ka galaan oo xoreeyaan magaalada Berbera. Muj Jeneraal Cali Xuseen


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

wuxuu command center ka sameeyay meel u dhaxaysa magaalooyinka Berbera iyo Hargeysa isagoo halkaa ka hagayay oo ka xidhiidhinayay ciidamadii kala duwanaa ee SNM ee galbeed iyo barri u kala kacay iyagoo halkaasi ku wada xidhiidhayaan tilifoonka gacanta ee la yidhaa (walkie Talk).

# Gunaanad:

Hadaba marka aynu ka hadlayno Mujaahid Gen. Cali Xuseen wuxuu xanbaarsan yahay kumaamkum mujaahid oo ku geeriydooday halgankii mudadi uu dhaxaysay 1982-1991 waxa kale oo uu huwan yahay saraakiishii halganka dabadii geeriyooday Alla ha u naxariistee iyo kuwo noolba ooy ka mid yihiin.Maalintani waxay tilmaan gaar ah siinaysaa Mujaahid Cali iyo inta la wadaagtah halkaa eey ka mid yihiin Axmed Jimcaale C/Qaadir Kosaar , Lixle , Maxamed Cali, Hagarwaafi, Maxamed Mooge, Axmed Macalin Haaruun , Ibraahin Koodbuur , Aadan shine, Aadan Saleebaan, Xasan Yoonis Habane , Jidhif, Maxamed Ibraahim ( Dayib guray),Haybe Cumar ,Xasan Kayd ,Ibraahim Maygaag Samater, Weerar iyo boqolaal aanan halkan ku soo koobi karin . Waxa kale oo marka laga hadlaayo General Cali Xuseen uu huwan yahay intii ku naafooday kuna agoomawday ,inta asay ku qaaday iyo cidkasta oo xaq u leh in lagu xuso halgankii magacoooda waayo wa xubinti usarasay ee ka qayb qaadatay halgankii SNM.Wax ka sheega Mujaahid Gen.Cali waxay si dhumuc leh inoogu deeqaysaa sooyaal hagameedkii ummada uu ka mid noqday hormoodku. Xuskiisu wuxuu inaga ridayaa xil inaga saarnaa mujaahidiinta oon xataa kala maagayno inaynu ardayda soo koraysa buugaagta dugsiyada ugu xaradhno .Waxaase mar walba u hiilinaya sheegista taariikhdooda dalka iyo dadka daneeya garanayana waxay muteen.

**Aasaasayaashii ururkii S.N.M:**

**1-Ahmed Mohamed Gulied (First Chairman)**

**2-Ahmed Ismacil Dikhsi (First General Secretary)**

**3-Dr. Abdisalam Y. Mohamed (First Secretary of Foreign affairs)**

**4-Said Abdillaahi Egal (First Secretary of Internal affairs)**

**5-Ahmed Gulied (Zaili) (First Party Secretary)**

**6-Hassan Essa Jama (First Political Secretary )**

**7-Mr. Mohamed Ahmed Zaidi (First Secretary of Finance)**

**8-Mohamed Hashi Eilmi (First Secretary at large )**

Waxaan ku soo gababaynaynaa xuskan maanso uu curiyey Jamaal Cali Xuseen oo uu kaga qayb qaadanayo xuskan maalintan mudan milgada dheeraadka ah , kuna xardhan qalbiyada ummada Somaliland ,midhihii ay geesiyaashii SNM dhaliyeena la hadhsanayo


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

maanta , ahna ta ay Somaliland kaga duwan tahay dalal badan oo jabhado xoreeyeen .SNM dalka dadkay u xoraysay ee iyadu may xoraysan ….

**Gabay magaciisa la yidhaa "Abaal –Gud", April 2[deeda], 2009.**

Waxaa tiriyey: **Jamaal Cali Xuseen,** oo ah wiil uu dhalay Mujaahid Cali Xuseen. Isagoo ugu talo galay xuska munaasibadan ku beegan April 6[deeda] oo ah maalintii SNM la aasaasay sannadkii 1981kii.

**Wuxuu yidhi ;**

**Halgan gobannimo doonkii SNM, guul ku soo khatimye**

**Waa mid taariikh gun dheer galo, xil la soo gutaye**

**Gef iyo gardaraa laga degaalamay, iyo gunnimo diide**

**Olol iyo dhib baa loo dhex galay, gumuc rasaaseede**

**Gaajiyo haraad baa laga mutiyo, geerri iyo ciille**

**Guhaad ciil iyo cadho kuwii, shicibka gaadhsiiyey**

**Dawlad ku sheegtii gaadmaduun, galabki qaadeeysay**

**Gocorro reenkii kuwii ummadda, nabarka gaadhsiiyey**

**Kuwii gardarrada waday waa tii, geesi uu helaye**

**Geesiyadii geedka u galee, goobtan ka xoreeyay**

**Waa kuwii siday guul u dhaliyaan, gaajo ax odhanaynin**

**Waa kuway gurmad miig iyo kaare, gawda uun ku hayeen**

**Waa kuwii mar qudha ka gabanee, goolka dhalinaayey**

**Giiryaalle raggii eryadee, geedka sare fuushey**

**Inaynu maanta guushood xusnaa, gaar bay noo tahaye.**

**Taariikhduna ma gaboowdoo, Guul Alla dhaliyee**


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

**Abriil lix waa in loo guddaa, abaalkay soo gashaye**

**Guul waa in lagu suntaa gugaas, geyi barwaaqeede**

**Abriil duco waa in loo guntaa, geesi oo idile**

**Xasuuso geesiyadii halgame, guusha dhalinaayey.**

**Ged-gedoonka waayuhu wuu qiri, taariikhda guudi**

**Gurmadkii maatida u kacaye, gooyey taladeeda**

**Waa kuwii ka gam'in xilkoodi, gudashadiisiiye**

**Seetada nimankii goostiyo, gedoodkii shicibka**

**Gal-dalool iyo quudhsi raggii, gardarada diidey**

**Gujo nacasta raggii ka dhiidhiyee, gaashaanka ku dhuftay**

**Waa kuwii godkuun ku jiree, kaga gig siinaayey**

**Waa kuwii god iyo dhufays galee, guntad ku raameeystay**

**Waa kuwii gelin iyo habeen, cadowga goobaayey**

**Waa kuwii goor walba naftood, guuto lagu saaray**

**Gowraca raggii joojiyee, kaga gariirsiiyey**

**Inaynu maanta guushood xusnaa, gaar bay noo tahaye.**

**Taariikhduna ma gaboowdoo, Guul Alla dhaliyee**

**Abriil lix waa in loo guddaa, abaalkay soo gashaye**

**Guul waa in lagu suntaa gugaas, geyi barwaaqeede**

**Abriil duco waa in loo guntaa, geesi oo idile**

**Xasuuso geesiyadii halgame, guusha dhalinaayey.**


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

**Ummadi gobanimo way higsataa, goor la gawracayee**

**Gantaalihi shicibka ku dhiciyo, nabaradii gaadhey**

**Guhaadkii haween iyo carruur, gunnimadii Taliska**

**Gef laynaga galuu ahaayoo, guul Ilaah bixiyee**

**Geeddi iyo jid dheer baa loo mariyo, geyi shisheedaade**

**Gufaac dabayl iyo habar dugaag, guri lagula hoydee**

**Guryo iyo adduun baa ku lumay, hanti ma guuraane**

**Halgan dhiiga dhuuxiisiyo gala, jiidhka gudahiisa**

**Mid aynu u wada guntanu ahaa, shicibka guushiise**

**Galbeed iyo Barri buu is qabsaday, galalac baaruude**

**Kuwii gardarada waday waa tii, geesi uu helaye**

**Raggii garaad iyo aqoonba, Guulle ku manaystay**

**Inaynu maanta guushood xusnaa, gaar bay noo tahaye.**

**Taariikhduna ma gaboowdoo, Guul Alla dhaliyee**

**Abriil lix waa in loo guddaa, abaalkay soo gashaye**

**Guul waa in lagu suntaa gugaas, geyi barwaaqeede**

**Abriil duco waa in loo guntaa, geesi oo idile**

**Xasuuso geesiyadii halgame, guusha dhalinaayey.**

**Goobtaan hadhkiyo nabada ahe, heerka sare gaadhey**

**Arligenan dawladnimo guddoonshe, gaadhka lagu meershay**


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

**Waa mid laabtayda gilgilaysoo, xaajo gaara ah e**

**Waa in guushaas la giijiyo, oon la gaba-gabeynin**

**Guul-guul colaad yaan la gelin, weerar gacaleede**

**Waa in guushaas la gaagixin, Guulle noo dhaliyey**

**Waa in geed lagu meeriyaa, oon gacalku ooyin**

**Mar kale gardaro darteed yaan, shacabku uu guurin**

**Halgankii geesiyadii waa in, loo garwaaqsadaye**

**Gurmadkoodii waa in la dhigtoo, guul lagu xardhaaye**

**Inaynu maanta guushood xusnaa, gaar bay noo tahaye.**

**Taariikhduna ma gaboowdoo, Guul Alla dhaliyee**

**Abriil lix waa in loo guddaa, abaalkay soo gashaye**

**Guul waa in lagu suntaa gugaas, geyi barwaaqeede**

**Abriil duco waa in loo guntaa, geesi oo idile**

**Xasuuso geesiyadii halgame, guusha dhalinaayey.**

**Geesiyadii duco loo mari, gelinba aamiinta**

**Godkii lagu xasuusay kuli, gabanadeeniiye**

**Gacan kor u baaciney dhamaan, Guulle baryadiisa**

**Inuu Guudka sare jannadii, Eebaheen geliyo**

**Xasuuso geesiyadii halgame, guusha dhalinaayey**.


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

# *Tixraac:*

-Xidhiidh lala yeeshay :
Caasha Aw-Faarax Cabdi (oo ah mujaahidka inaadeertii ah)
Fadumo-Burco Muuse Cabdi (oo ah mujaahidka inaadeertii ah)
Jamaal Cali Xuseen (oo ah wiil uu dhalay mujaahidku)

-Taariikhda Aaskii Midnimada iyo Raja-gabka Somaliweyn,
Qalinkii: Ibrahim Hassan Gagale
Mareegta Farshaxan

-Qolka Kaydka ee Mareegta Farshaxan.

-Maqal iyo Muuqaal: Wareysi uu Maxamed Baaruud la yeeshay
Mujaahid Cali

Qoraal: Taariikhda iyo Khayraadka Gobolka Oodweyne
Cabdiraxmaan Jaamac Axmed (Abdi-Shotali)
Mareegta Oodweyne News
Waraysi : Maxamed Cabdi Ilig,
Weriye ka tirsan Horn Cable TV
Hargeysa Somaliland

Xasuus: Mujaahid Gen. Cali Xuseen iyo Iskuul loogu magac daray
Axmed-kayse Cali Rooble
Freelance journalists, SWEDEN

-Maxaad ka taqaanay ale ha u naxariistee
taariikhda halgamagii Cali Xuseen Cabdi
Mareegta Longlivesomaliland.com

Qalinkii iyo tifatirkii : Bahda Mareegta Farshaxan

Copyright (c) 2003 Mareegta Farshaxan. All rights reserved.


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.